



## Fahanka Gu'ga Ardaygaaga 2025 ee Maine ayadoo la Adeegsanaayo Warbixinta Buundada Imtaxaanka

### Cabirka Buundada Maine

Jaantusyada midabka leh, ee jiifa ee ku qoran warbixinta ardaygaaga ayaa muujinaaya buundada heerka ardaygaaga ee Maine. Buundadaan ayaa cabiraysa dedaalka ardaygaaga ee ku aadan imtaxaankaan ayadoo laga eegaayo xirfadaha muhiimka ah ee akhriska iyo xisaabta ee heerka fasalkiisa marka loo eego Heerarka Buundada Guud ee Gobalka.

Imtaxaanka akhriska ee fasalka 6-aad wuxuu cabiraa xirfadaha sida:

- U adeegsiga tusaaleyaasha iyo xikaayooyinka si loo sharxo macnaha sheekoooyinka, ciyaaraha, gabay-yada, iyo qoraallada xogta.
- Aqoonsiga sida qaab dhismeedka sheekada, ciyarta, ama gabaygu isku waafaqsan yahay si loo abuuro mawduuc, goob, ama qayb.
- Go'aaminta fikradaha wariyaha ama hadal jeediyaha.
- Sharaxaada sida qoraagu ku abuuray fikirka wariyaha ama hadal jeediyaha qoraalka.

Imtaxaanka xisaabta ee fasalka 6-aad wuxuu cabiraa xirfadaha sida:

- Fahanka sida saamiyada iyo qiimeyaashu ula xiriiraan xisaabta ku dhufada iyo u qaybida.
- Adeegsiga cabirada iyo qiimeyaasha si looga jawaabo su'aalaha.
- Fahanka jajabka u qaybida si buuxda.
- Gaarsiinta aqoonta lambarada tirooyinka togan iyo kuwa taban.
- Qorista, fahanka, iyo adeegsiga muujinta iyo qaacidada xisaabta.

Cabirka Buundada Maine ayaa la xiriirta heerka guusha oo qeexaaya sida waxqabadka ardaygu u waafaqsan yahay himilooyinka gobalka. Heerarka guusha ayaa Aad uga Hooseeya Filashada Gobalka, Ka Hooseeya Filashada Gobalka, Ku siman Filashooyinka Gobalka, iyo Ka Sareeya Filashooyinka Gobalka.

### Aalada Fahanka Heerka Guusha

[Aalada Fahanka Heerka Guusha](#) ayaa ku siinaya xogta faahfaahsan ee heerarka gaarka ah ee waxbarashada oo lagu qiimeynaayo heerka fasal kasta iyo sida heerarkaan loogu kala qaybiyo xirfadaha kaladuwan ee heerka kasta oo guusha kamid ah.



*Hel Aalada Fahanka Heerka Guusha*